# Dare to Care!

## – arrin bini'aadantinimo ah

Tierpsbyggen, Degmada Tierp iyo Booliska ayaa si wadajir ah uga shaqeeya iftiiminta rabshadaha ka dhaca xiriirrada dhow, iyo waxa aynu sida deris iyo bini'aadmi ahaan u samayn karno si aan uga hortagno.

Sida qof ku nool dhisme dabaqyo ah, waxaad maqli ama arki kartaa wax kaa yaabiya oo dareenkaaga kicisa.

Waxaan rabnaa inaan ku dhiirrigelinno inaad wax ka qabato haddii aad u malaynayso in qof uu khatar ku jiro. Uma baahnid inaad hubto gabi ahaanba—shaki kaliya waa ku filan inaad u malayso in qof uu halis ku jiro.

Haddii ay jirto tuhun ah dembi socda ama khatar degdeg ah, fadlan ha ka waaban inaad la xiriirto **Booliska 112**.

Haddii aadan hubin in dembi dhacay ama la samaynayo, waxaad wici kartaa xafiiskayaga 0293-130 25. Ka dib saacadaha shaqada, dooro lambarka 2 si aad u gaarto adeegga gurmadka. Haddii loo baahdo, iyagaa booliska kula xiriiri kara.

Lama huraan ma aha inaad magacaga sheegto, laakiin waa muhiim inaad aaminto dareenkaaga—**waxay badbaadin kartaa nolosho!**

Waxaa jira hay'ado badan oo aad la xiriiri karto haddii adiga, qaraabo ama deris aad u baahan tihiin caawimo ama taageero.

### Lambarrada taleefanka ee muhiimka ah

**Booliska:** 112 (degdeg)
**Booliska:** 114 14 (aan degdeg ahayn)
**Adeegga Bulshada:** 0293-21 80 00
**Adeegga Gurmadka Bulshada:** 018-15 00 00

**Hoyga Dumarka Liljan:** 0293-100 22
**Tierpsbyggen:** 0293-130 25

**Ka dib saacadaha shaqada: isla lambarka wac dooro 2 → adeegga gurmadka guryaha**

Sanadkii 2021, 19 kiis oo dil ah ayaa ka dhacay Iswiidan halkaas oo dhibbanaha iyo dambiiluhu ay ku jireen xiriir lammaane.

17% dhammaan kiisaska dilka ee 2021 waxay ku jireen xiriir lammaane.

Inta badan rabshadaha ka dhaca xiriirrada dhow looma soo sheego booliska. Kaliya rubuc ayaa la soo warbixiyaa.

*Isha: Golaha Qaranka ee Kahortagga Dembiyada Iswiidan*



## Dare to Care!

Ujeedadu waa in la faafiyo aqoonta iyo wacyiga ku saabsan rabshadaha ka dhaca xiriirrada dhow. Waxaan tan ku sameynaa annagoo mashruuca ka dhigaya mid la arki karo oo aan qabanayno hawlo kala duwan.

Ujeeddada Dare to Care waa in dadka lagu kordhiyo wacyiga rabshadaha ka dhaca xiriirrada dhow, laguna dhiirrigeliyo in la falceliyo marka qof loo maleeyo inuu ku jiro khatar.

Waxaan rabnaa in aan ku darno milkiilayaasha guryaha, ururada guryaha iyo hay'adaha kale ee deegaanka si ay u taageeraan hindisaha.

Dare to Care waxay ka timid Östhammarshem, Tierpsbyggen-na waxa uu doortay in uu ka qayb qaato. Markii degmooyin kale ay ku biiraan, hindisuhu wuu sii fidi doonaa. Wadajir, waxaan samayn karnaa isbeddel.

Waxaad ka akhriyi kartaa macluumaad dheeraad ah tierpsbyggen.se, halkaas oo aad ka heli karto taageero ama caawimaad haddii loo baahdo.

**Macluumaad luqado kale ku qoran, sawir koodhka QR.**

**Rabshad jidheed**
Dhuuqid, riixid, dharbaaxo, laad, qoorta qabasho, isku day in la suuxiyo, ku dhufasho qalab ama hub.

**Rabshad galmo**
Taabasho aan la rabin, lagu qasbo in qofku sameeyo falal galmo ama uu u babac dhigo, kufsi, ama in lagu khasbo inuu daawado falal galmo oo kala duwan.

**Rabshad maskaxeed**
Kalagoyn ama go'doomin, aflagaado, handadaad shucuureed, ceebayn, cadaadis maskaxeed.

**Rabshad hantiyadeed**
Burburinta alaabta guriga ama waxyaabo kale oo ku jira guriga. Qofka nugul waxaa lagu qasbi karaa inuu burburiyo alaabo u gaar ah oo aad muhiim ugu ah. Rabshaddu waxay sidoo kale ku wajihi kartaa xoolaha guriga.

**Rabshad dhaqaale**
Xakameynta dhaqaalaha guriga, kaar bangi oo la qaato, ku qasbid qofka inuu sheego kharashaadkiisa, ku qasbid inuu amaah qaato si uu uga fogaado rabshad, ama in lagu qasbo inuu joojiyo shaqada si uu u waayo dakhliga uu isagu leeya-hay.

**Rabshad qarsoon / joogto ah**
Waxay tilmaamaysaa cabsi joogto ah ama dareen ku saabsan rabshad. Waxay noqon kartaa xanaaq ama cadho ay muujiyaan jirkooda, codkooda ama hadalko-oda, taas oo abuureysa cabsi oo loo arko hanjabaad ama xusuusin ku saabsan rabshad hore.

**Daryeel la'aan**
Inaan la siin cunto, nadaafad, daawo, ama in si ula kac ah loo qariyo ama loo burburiyo qalab muhiim ah, si qofka dhibbanaha ah uu ugu sii tiirsanaado qofka dhibaateynaya.

Iskaashi dhexmara

Tierpsbyggen Polisen TIERPS KOMMUN Kvinnojouren Liljan TIERP – ÄLVKARLEBY Hyresgästföreningen